# Statens barnehus

La kulanka qoyska

# Kulan qoys oo ka dhacaya Xarunta carruurta

Waxaa lagaga yeeray inaad ka qaybgasho kulan warbixinneed oo lagu qabanayo Xarunta carruurta ee boolisku ku waraystay ilmahaaga.

## Waa maxay sababta keentay kulanka Xarunta carruurta?

Waxannu rabnaa in aannu ku siinno warbixin ku saabsan wixii ilmahaaga ku dhacay maanta, ka hor intaydaan dib u kulmin oo Xarunta wada aadin. Waxa kale oo muhiim kuu noqon kara inaad aragtid meesha ilmahaagu joogay, iyo dadka ilmahaagu la kulmay. Waxannu ognahay in imaanshaha Xarunta carruurta iyo waraysiga boolisku kadeedis iyo walal ku abuurayaan carruurta iyo dadka waaweyn ba. Taas darteed waxannu rabnaa in aannu warbixin wacan idin siinno, si idinku qoys ahaan sida ugu wacan u fahantaan oo u xalisaan xaaladiina.

## Maxaad ka samayn doontaa Xarunta carrurta?

- Waxaad ogaan doontaa wixii dhacay maalintaas, sida xaaladda ilmahaagu ahayd iyo dadka ilmahaaga keenay meesha
- Waxaad ogaan doonta dadka ka mid ah ama ka shaqaynayay kiiska
- Waxa lagu siinayaa tilmaamo iyo talooyin ku saabsan qaabka aad ilmahaaga ula dhaqmaysid waraysiga booliska kadib
- Waxa lagu siinayaa macluumaad ku saabsan qaabka aad ula xiriiri kartid dhammaan dadka kiiska ka shaqaynaya, waxaanad balamo la samaysan kartaa Hay`adda daryeelka carruurta iyo Xarunta carruurta

## Yaad la kulmi dontaa?

- Dembi-baadhe ka tirsan booliska
- Mas`uulka kiiska oo ka tirsan Hay`adda daryeelka carruurta
- Shaqaale ka tirsan Xarunta carruurta

## Maxaa dhacaya markaad timaado Xarunta carruurta

Markaad timaado Xarunta caruurta waxaad la kulmi doontaa dembi-baadhe, shaqaale ka tirsan Xarunta carruurta iyo shaqaale ka tirsan Hay`adda daryeelka carruurta. Marka hore dembi-baadhaha booliska ayaa ku siinaya warbixin. Marka warbixintaas lagu siiyo waxa kulanka ka baxaya dembi-baadhaha. Ka dibna Hay`adda daryeelka carruurta iyo Xarunta carruurta ayaa ku siin doona warbixin kooban oo ku saabsan wixii dhacay maalintaas iyo sida xaaladda ilmuhu ahayd.

Mararka qaar waxay carruurtu sheegtaa sida ay rabaan in qoysku noqdo waraysiga ka dib. Hay`adda daryeelka carruurta iyo Xarunta carruurtu waxay sheegi doonaan in yar oo ku saabsan wixii ilmuhu sheegay, islamarkaana haddii aad u baahan tihiin waxaad samayn kartaan qorshe ku saabsan waxa dhici doona markaad Xarunta tagtaan.

Ka dib wadahadalka aad la yeelanaysaan Hay`adda daryeelka carruurta iyo Xarunta carruurta waxaad aadi doontaan ilmahiina oo idinku sugaya qol. Waxaad kaloo arki kartaa qaybaha kala duwan ee Xarunta carruurta.

Ugu dambayntii waxannu qaban doonnaa kulan gunaanad ah oo ay isla qaadanayaan ilmaha, adiga oo ah waalidka, Hay`adda daryeelka carruurta iyo Xarunta carruurta. Kulankaas ka dib waxaad aadi kartaan Xarunta .

# Macluumaadka xidhiidhka:

| | |
|---|---|
| Dembi-baadhe: | |
| Hay'adda daryeelka carruurta: | |
| Statens barnehus: | |

POLITIET

STATENS BARNEHUS
Et tverrfaglig kompetansehus